



Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliska Minneapolis

Tirada:
9-100

Cadadka 9aad – Siyaasadaha Dhaqangelinta

Xariga Dadka Waaweyn

9-107 **Xadhiga Muwaadinka**

(05/29/02)

(A-B)

Muwaadinka loo xidhay ka yar dambiyada waxa la soo rogi karaa oo kaliya marka fal-dembiyedka lagu sameeyo iyadoo uu joogo qofka cabanayo.

Muwaadiniinta xidhaya waa inay buuxiyaan Foomka Xidhida Muwaadinka (MP-3406). Shaqaalaha amniga ee ilaaliya meheradaha ee sameeya xidhitaannada joogtada ah waxaa loo ogolaan karaa inay isticmaalaan warbixinta dembiga ee CAPRS halkii ay ka isticmaali lahaayeen foomka Xidhitaanka Muwaadinka.

Saraakiisha ayaa go'aamin doona in xaalanduhu ay sabab u yihiin in eedaysanaha xabsiga la dhigo. Haddi saraakiishu ay dareemaan in xidhidhistu tahay sharci darro, sarkaalku waa in uu u gudbiyaa Xafiiska cabashada ee Xeer Ilaaliyaha Magaalada.

Haddii eedaysanaha xabsiga la dhigayo, saraakiishu waa inay xaqijiyaan aqoonsiga qofka cabanaya oo ay gacan ka geystaan dhammaystirka Warbixinta Xadhigga Muwaadinka. Cabashooyinka waa in lagula taliyaa in Xeer Ilaaliyaha Magaalada uu ogeysiin doono haddii cabasho rasmi ah loo baahdo.

Fiiro gaar ah: Fiiri Qaybta Buugga ee Xadhigga Muwaadinka - Xadgudubka Gaadiidka.